

## **Warbixin ku socota ka qaybqaataha gelaya imtixaanka afka noorweyjiga iyo maadadda aqoonta bulshadda**

### **Imaanshaha goobta:**

Waa inaad goobta imtixaanka lagu galayo ku timaadid wakhtigii loogu talagalay. Ka qaybqaatayaasha soo daaha, waa la celin doonnaa. Eeg warbixinta ku saabsan wakhtiga iyo goobta, ee ku qoran warqadda iskuulku soo diray.

Aqoonsiga: Marka aad timaadid goobta imtixaanka lagu qaadayo, waa inaad tustid warqad aqoonsi oo aan dhacsanayn. Sidoo kale waxaa lagaa rabbaa inaad saxeexid liistadda ka qaybqaatayaasha.

Waraaqaha aqoonsi ee la ogolyahay ayaa ah:

- Baasaaboorka
- Liisanka baabuurka oo noorweyji ah
- Kaadhka bangiga oo sawir leh, ahna mid noorweyji ah
- Warqad aqoonsi muwaadin (Nasjonalt ID-kort) oo lagu bixiyey wadamada EØS-ta mid ka mid ah
- Waraaqaha safar ee qaxoontiga iyo baasaaboorka dadka ajaanibka ah la siiyo
- Kaadhka ogolaanshaha joogitaanka dadka ajaanibka ah ee Norway
- Magangeylo-doonka aqoonsigooda magaca iyo meesha ay ku dhasheen ku qorantahay

Magaca: Marka aad saxeexaysid liistada ka qaybqaatayaasha. Waa inaad hubisid in magaca, cinwaanka iyo taariikhda dhalashadu sax tahay.

Cadayn: Hadii lacagtii lagu galayey imtixaanka aad ku bixisay faktura. Waa inaad soo qaadatid cadayn markaad imanaysid imtixaanka. Laakiin hadii aad ku bixisay kaadhka bangiga, uma baahnid inaad caddeyn keentid.

Waxyaabaha la isticmaali karo: Inta imtixaanku socdo, laguuma ogola inaad wax ku caawin kara aad isticmaashid. Lama ogola inaad kumbuyuutarkaaga isticmaashid.

Waxa wax lagu qorayo: Laguuma ogola inaad isticmaashid wax aad qoraalka ku qortid oo aad adigu sidatay. Hadii aad u baahantahay, waxaa lagu siinayaa qalin iyo waraaq. Waraaqdaas oo ay tahay inaad soo celisid, ka hor intaanad ka bixin goobta imtixaanka.

Moobiil telefoonka: Waa inaad wada demisid oo aad iska fogaysid moobiil telefoonkaaga marka aad imtixaanka bilowdid. Lama ogola inaad jeebka gashatid, ama meel kaa ag dhow aad dhigtid. Hadii lagugu qabto moobiilkaaga, waxaa loo qaadanayaa iskuday khiyaamo.

Xannuun: Hadii aad xannuunsatid, waa inaad soo dirtid ama keentid caddeyn dhakhtar ama sykemelding. Waxaanad iskuulka ugu keenaysaa ugu danbayn todoba (7) maalmood kadib markii imtixaanka la galay. Waxaa markaa kuu suurto galaysa inaad imtixaan kale isu diwaangelisid. Adiga oo aan wax lacag ah lagaa qaadahayn.

Khiyaamo: Khiyaamadda ama isku dayga khiyaamada, ayaa waxaa uu keenayaa:  
In lagaa saaro goobta imtixaanku ka dhacayo  
-In lagu siin waayo caddeynta qaadashada imtixaankan (prøvebevis)  
-Imtixaanka kale markaa gelayasid inaad bixisid lacagtii imtixaanka

Caddeynta imtixaanka: Iskuulka ayaa caddeynta imtixaanka (prøvebevis-ka) u diraya, cinwaanka kuugu qoran liistadda ka qayb galayaasha. Waa inaad iskuulka u sheegtid, hadii cinwaan cusub aad yeelatid.

Xaqa aad u leedahay inaad ka dacwootid natiijadda imtixaanka: Waxaad xaq u leedahay inaad ka dacwootid natiijadda imtixaanka, qaybtiisa qoraalka ah (norskprøven). Mudadda aad kaga soo dacwoon kartid ayaa ah saddex usbuuc gudahood, marka natiijadda la shaaciyo.

Khaladaadka rasmiga ah ee lagaga dacwoonayo, habfulinta imtixaanka:  
Waad ka dacwoon kartaa khaladaadka rasmiga ah, ee habka loo fulinayo imtixaanka aqoonta bulshada, noorweyjaha oralka ah, iyo fahamka akhrinta iyo maqalka qaybta imtixaanka ah.

Mudadda ay tahay in lagu soo dacwoodo, ayaa ah saddex usbuuc oo ka bilaabmaya maalintii imtixaanka la galo.

Ka eeg warbixinta ku saabsan xaqa aad u leedahay ka dacwoodka [www.norskprøven.no](http://www.norskprøven.no) iyo [www.samfunnskunnskapsprøven.no](http://www.samfunnskunnskapsprøven.no).

Ka hor intaan imtixaanka la bilaabina. Waxaa kuu suurtoagal ah inaad su'aalo qaabka fulinta ah inaad waydiiso.